Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Dhalashadii Ciise



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter; Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2020 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Wakhti fog hortiis, Ilaah waxa uu malag Jibriil gabadh yar oo bikro ah magaceedana la yidhaahdo Maryan.



Wuxuu iyada ku yidhi, "waad uuraysan doontaa oo wiil baad umuli doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Ciise. Nin weyn buu ahaan doonaa. waxaana loogu yeedhi doonaa Wiilka Kan ugu sarreeya."



"Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo." ayaa gabadhii ay weydiisay. Malaggiina wuxuu Maryan u sheegay in wiilku uu ka iman doono xagga Ilaah. Looma baahan doono markaas aabbe aadane ah.



Malaggii dabeetana wuxuu Maryan u sheegay in inaadeerteed Elisabed ay iyadoo weyn dhali doontay ilmo.  Sidoo kale, tani waxay ahayd mucjiso. Wakhti gaaban dabadiis, Maryan waxa ay booqatay Elisabed.  Ilaah ayaanay si wada jira u ammaaneen.



Maryan waxa ay u doonnaneyd nin la odhan jiray Yuusuf. Yuusuf haddaba aadbuu uga xumaaday markuu ugaaday in Maryan ay ilmo uurka ku siddo. Waxa uu u maleeyay in nin kale uu yahay ilmahan ay sido aabihiis.



Malaggii Ilaah ayaa Yuusuf riyo uugu sheegay in ilmahani uu yahay Wiilka Ilaah.  Waxa markaas ay ahayd inuu Yuusuf Maryan ku caawiyo inay daryeesho Ciise.





Yuusuf wuxuu isku halleeyay oo addeecay Ilaah. Sidoo kale wuxuu addeecay sharciyada waddankiisa. Sharci cusub oo yimid aawadiis, Yuusuf iyo Maryan waxa ay ka tegeen magaaladii ay u dhasheen oo ahayd Beytaxam si ay u dhiibaan cashuurtooda.


Maryan waxay diyaar u ahayd inay umusho ilmeheeda. Laakiinse Yuusuf meelna kamuu helin qol ay ku dhasho. Meelaha loo hoydo oo dhammi
waxa ay ahaayeen kuwo buuxa.

Ugu danbayntii Yuusuf waxa uu helay meel uu ku dego. Halkaasna waxa ku dhashay wiilkii Ciise.

Hooyadii waxa ay dhigtay qabaal lagu rido cuntada la siiyo xoolaha.




Meel agtooda ah, waxa jiray adhijirayaal xoolohooda hurda ku ilaashanayay. Dabeetana iyada waxa u muuqday malaggii Ilaah oo ku wargeliyay warka cajiib leh.


"Maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah. Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli doontaan ilmo maro ku duudduuban oo ku jiifa qabaal."



Si kedis ah, waxa u muuqday malaa'ig badan oo iftiimaysa, waxayna ammaanayeen Ilaah iyagoo leh, "Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya,

Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda."

Adhijirayaashii waxay u dhaqsadeen xaggii ilmuhu jiray. Markii ay arkeen ilmahana cidkasta oo ay arkeen waxay u sheegeen waxyaalaha malaa'igtu ka tidhi Ciise.





Afartan maalmood dabadood, Yuusuf iyo Maryan waxay Ciise keeneen macbadka Yeruusaalem. Halkaas waxa joogay nin magaciisa la yidhaahdo Simecoon oo Ilaah ku ammaanay ilmaha, halka haweenay weyn oo Anna la yidhaahdo oo Rabbiga u adeegtaana ay ka mahad celisay.



Labaduba waxa ay ogaadeen in Ciise uu yahay Wiilka Ilaah, oo ah Badbaadiyaha lasii ballanqaaday. Yuusuf waxa uu qurbaan ahaan u bixiyay labo xammaam. Kani waxa uu ahaa allabariga uu jideeyay sharciga Ilaah oo ah in dadka saboolka ahi ay tahay inay wax keenaan marka ay ilmo dhashay soo hordhigayaan Rabbiga.



Wakhti dabadiis, xidig khaas ah ayaa niman xikmad leh kasoo hagtay Yeruusaalem xaggeeda bari.

Waxa ay nimankii yidhaahdeen, “Xaggee buu joogaa boqorka Yuhuudda ee dhashay? waxaannu u nimid inaannu caabudno.”

Boqor Herodos waxa uu maqlay nimankii xikmadda lahaa. Waa uu warwary oo iyagana wuxuu weydiistay inay ogaysiiyaan marka ay helaan Ciise. Waxa uu yidhi, "si aan anna ugu tago oo u caabudo." Laakiin been ayuu sheegayay oo waxa uu rabay inuu dilo Ciise.



Xidigtii waxa ay nimankii xikmadda lahaa ku hoggaamisay gurigii ay Yuusuf iyo Maryan kula noolaayeen ilmihii yaraa ee Ciise. Iyagoo jilabaha dhulka dhigaya oo caabudayana, nimankii socotada ahaa waxa ay Ciise siiyeen hadiyo qaaliya oo isugu jira dahab iyo udug.



Ilaah wuxuu nimankii u sheegay inay si hoos ahaana uugu laabtaan guryohoodii. Herodosna wuu cadhooday.



Waxa uu go'aansaday
inuu Ciise ka takhaluso,
dabeetana boqorkii
xumaanta badnaa waxa uu
laayay carruurtii wiilasha
ahaa ee ku sugnaa Beytlaxam.





Laakiin Herodos muu waxyeellayn karin Wiilka Ilaah! Yuusuf waxa loogu digay riyo dabeetana wuxuu Ciise u kexeeyay Masar si uu u badbaadiyo.



Markii Herodos dhintay dabadeed, Yuusuf waxa uu Maryan iyo Ciise

dib uuga soo celiyay Masar. Waxa ay markaas ku noolaadeen magaalada yar ee la yidhaahdo Naaseret, oo u dhow badda Galiilee.

Dhalashadii Ciise

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 1-2, Luukos 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16